# Qalliin isudiyaarin

## Carruur yar-yar



Albam qoraal-sawirkan waxaa soo diyaarintiisa iska kaashaday hay´adda qaabilsan hawlaha caafimaad sare u qaadista, Kuleejada Høgskolen i Oslo og Akershus iyo qaybta qalliinnada carruurta ee hosbitaalka Oslo universitetssykehusAlbam qoraal-sawirkan waxaa soo diyaarintiisa iska kaashaday hay´adda qaabilsan hawlaha caafimaadka sare u qaadista, Kuleejada Høgskolen i Oslo og Akershus iyo qaybta qalliinnada carruurta ee hosbitaalka Oslo universitetssykehus

Sawir-qaade: Øystein H. Horgmo, Universitetet i Oslo

© OUS HF 2017

Oslo universitetssykehus

HØGSKOLEN I OSLO OG AKERSHUS

Waa wax iska caadiya in marka ilmo yari uu qalliin gelayo ay waalidka iyo ilmuhuba waxoogaa qalliinka ka sii welwelaan. Waxaa haddaba welwelkaa ilmaha lagaga yarayn karaa iyadoo qalliinka ka hor sawirro qalliinka uu gelayo ku saabsan la daawadsiiyo oo qalliinka looga sii sheekeeyo. Sidaa darteed waxaa la diyaariyay albamo qoraal-sawir oo ku saabsan qalliimada carruurta ah, kuwaa oo ku habboon da´da ilmaha qalliinka gelaya si ilmuhu wax uga sii ogaado qalliinka uguna sii diyaar garoobo. Albam qoraal-sawirka waa in ilmaha loo akhriyaa. Waxa uu kabayaa warbixinaha kale ee ilmaha la siinayo. Albam qoraal-sawirku waa in uu ku habboonaada ilmaha qalliinka gelaya, waana in ilmaha loo akhriyaa mar ku dhow marka uu uu qalliinka gelayo isagoo ku sugan xaalad deggan.

Kalkaalisada caafimaad ayaa qalliinka ka hor idiin akhriyi doonta albam qoraal-sawirka. Sidaa darteed waa muhiim in aad su´aalo sii diyaarsataan. Albamka waxaa loo soo diyaariyay sida ugu habboon ilmaha qalliinka gelaya iyadoo la adeegsanayo aqoonta ugu dambaysa uguna casriyaysan ee ku saabsan marka ilmaha qalliinka loo diyaarinayo.

© OUS HF 2017




Rasmus qalliin ayuu gelayaa, aabihii ayaa hosbitaalka u soo raacay.

Rasmus iyo aabihii waxay salaamayaan mid ka mida shaqaalaha hosbitaalka qaybta qalliinka.

© OUS HF 2017



Rasmus wuxuu joogaa qolka cayaarta inta uu sugayo inuu la kulmo dhakhtarka iyo kalkaalisada caafimaad.

© OUS HF 2017



Kalkaalisada caafimaad waxay Rasmus iyo aabbaha kala hadlaysaa waxa dhici doona inta ay hosbitaalka ku jiraan.



Waxay wayddiinaysaa in Rasmus iyo aabuhu wax su´aala ah qabaan.

**SU´AAL:**
Maxaad u malaynaysaa in Rasmus wayddiin doono?

© OUS HF 2017



Rasmus waa la miisaamayaa qalliinka ka hor.



Kalkaalisada caafimaad Rasmus dhererkiisa ayay cabbiraysaa.

© OUS HF 2017



Kalkaalisada caafimaad cadaadiska dhiigga ayay Rasmus ka cabbiraysaa si loo ogaado garaaca wadnaha, Aaladda lagu cabbiro gacanta ayay kaga xiraysaa.
Waxoogaa cadaadis ah ayuu gacanta ka dareemayaa. Rasmus ayaa ku caawinayaa in uu batoonka laga daaro aaladda riixo.



© OUS HF 2017



Dhakhtarka ayaa Rasmus iyo aabaha la hadlaya.

Wuxuu uga warramayaa qalliinka, wixii su´aalo ahna waa uga jawaabayaa.

**SU´AAL:**
Maxaad u malaynaysaa in ay wayddiin doonaan?



Dhakhtarku wuxuu dhegaysanayaa wadnaha iyo sambabada Rasmus, wuxuu isticmaalayaa aaladda stetoskop-ka.

Waa yara qabow marka stetoskop-ku jirka taabto.

© OUS HF 2017





Rasmus dhiig ayaa laga qaadayaa, kiriim kabuubyo  ayaa loo mariyay si aanay cirbaddu u xanuujin.jawaabayaa.



Rasmus dhabta aabbihii ayuu ku fadhiyaa marka dhiigga laga qaadayo.



© OUS HF 2017



Hadyad ayaa Rasmus la siinayaa ka dib marka dhiigga laga qaado.

© OUS HF 2017

Rasmus waxaa la siiyay boorso qalab caafimaad oo cayaar ahi uu ku jiro.






Rasmus wuxuu ku cayaarayaa qalabkii la siiyay.

© OUS HF 2017



Waa muhiim in Rasmus nadiif ahaado marka la qalayo. Sidaa darteed waa in uu qubaystaa intaanu seexan. Sariirta uu seexanayyana waa in ay nadiif ahaataa.




Hadda Rasmus iyo aabihii way seexanayaan. Qalliinka ka hor waa in aanu Rasmus waxna cunin waxna cabbin.

© OUS HF 2017



Subaxdii dambe Rasmus goor hore ayuu kacay. Waa yara fiigsan yahay.  Kalkaalisada caafimaad waxay cabbiraysaa in uu qandho leeyahay.

Marka Rasmus la qalayo waxaa xidid gacanta ah lagaga rakibayaa tuubbo dhuuban oo daawooyinka loo raacin doono. Kiriim kabuubyo ayaa loo marinayaa gacanta si aanay cirbaddu u xanuujin. Rasmus calaamad muujinaysa magaciisa iyo dhalashadiisa ayaa gacanta lagaga xirayaa.





Halkan waxaad ka aragtaan Rasmus oo xidid gacanta ah ay kaga rakibantay tuubbada dawooyinka loo marinayaa. Tuubadan ayaa dawaada suuxintana loo raacinayaa.

© OUS HF 2017




Halkan waxaad ku aragtaan Rasmus oo la siinayo daawo kaar-jebin, si aanu xanuun u dareemin marka qalliinku u dhammaado.

© OUS HF 2017





Kalkaalisada caafimaad waxay Rasmus iyo aabbihii u sii waddaa hoolka qalliinka. Boombalahiisana waa sii qaadanayaa. Aabbaha waa loo oggolyay in uu raaco, sidaa darteed ayuu dharkii hosbitaalka u gashaday.




Dadka ka qaybqaadanaya qalliinka waxay xiran yihiin dhar cagaaran, waxay salaamayaa Rasmus iyo aabbihii. Rasmus waxay siiyeen boombalo isagana layiraa Rasmus!

© OUS HF 2017



Farta waxaa lagaga xiray qalab lagala soconayo in uu si fiican u neefasanayo, xabadkana waxaa lagaga xir-xiray qalab lagala soconayo garaaca wadnihiisa.



Korkiisa waxaa ku rakiban nal wayn oo qoraxda u eg.

© OUS HF 2017



Carruuraha kuwo waxaa daawada suuxinta laga siiyaa tuubbo xidid gacanta ah lagaga rakibo, kuwana maasko ayaa afka iyo sanka loo geliyaa oo naqaska ayaa loo raaciyaa. Rasmus aabbihii ayaa la joogaa. Halkan waxaad ku aragtaan Rasmus oo daawada suuxinta laga siinayo xidid gacanta ah.



Halkan waxaad ku aragtaan Rasmus oo daawada suuxinta naqaska loo raacinayo. Wuxuu leeyahay si kale ayay uraysaa.

© OUS HF 2017




Rasmus  qalliinkii waa u dhammaaday oo qolka suuxin-ka-soo-kaca ayuu jiifaa. Wejigiisa waxaa horyaal bakeeri hawo siinaya. Carruuro iyo waalidiin kale ayaa qolka iyana jiifa. Qalabka qolka ku rakibani mar walba dhawaaqyo ayuu bixinayaa.



Kalkaaliso caafimaad ayaa si fiican u ilaalinaysa Rasmus. Waxay wayddiinaysaa in wax xanuuna uu dareemayo ama uu lalaboonayo, si ay daawo caawisa u siiso.

© OUS HF 2017




Rasmus waxaa la siiyay shahaado, jallaatan waa helay. Ka dib marka dhakhtarku la hadlo Rasmus wuu ka bixi doonaa hosbitaalka ama qaybtii uu ku jiray ayaa loo wareejin doonaa. Aabbaha iyo labadiisa boombalena waa raaci doonaan.

© OUS HF 2017



Waa muhiim in Rasmus cabitaan badan cabbo qalliinka ka dib. Waxaa la siinayaa xaashi ay bakeeriyo ku sawiran yihiin, mar kasta oo uu bakeeri cabitaan ah cabbaba mid ka mida bakeeriyada ayuu midabaynayaa. Tani waa mid uu xiisaynayo.

© OUS HF 2017



Kani waa Rasmus oo buug ay wada akhriyayaan gabadh ka shaqaysa qolka cayaarta.



Qolka cayaarta waxaa yaalla cayaaro badan oo fiican.

© OUS HF 2017



Kuwani waa Rasmus iyo aabbihii oo hosbitaalka ka baxaya.
Nabadeey kulligiin!

© OUS HF 2017

© OUS HF 2017

© OUS HF 2017

Oslo universitetssykehus

HØGSKOLEN I OSLO OG AKERSHUS